## Calaamadaha iyo astaamaha

### Cudurka Qoor-gooyaha:

- qandho
- madax xanuun aad u daran
- matagid
- qoor adag
- dhibsashada nalalka aad u ifaya
- finan
- wareer, jahwareer
- hurdo badni daran, miyir beelid
- qalal

### Sumowga dhiigga:

- qandho iyo qarqaryo
- matagid
- xanuun daran iyo xanuun ku dhaca addimada iyo kala goysyada jirka
- gacmaha iyo cagaha oo aad u qabow
- maqaar cirro leh ama bararsan
- neefsasho degdeg ah
- shuban iyo calool xanuun
- 'nabaro' casaan ah ama guduudan ama finan leh dhibco aan ku baaba'ayn cadaadis - sameey tijaabada dhalada ee lagu sharaxay boogga dambe. Maqaarka madow, ka eeg gudaha daboolka indhaha ama saqafka afka halkaasoo dhibcuhu ay aad uga muuqan karaan
- socodka iyo istaagida oo qofka ku adkaata
- hurdo daran, miyir beelid

**Qof kastaa ma yeelan doono dhammaan astaamahan - waxayna u soo bixi karaan si kasta oo si isku dhafan ayayna uga soo muuqan karaan labada jirro. Waa muhiim inaad raadsato talo caafimaad oo hore haddii adiga ama saaxiibkaa aad leedihiin astaamo walaac leh ama xaalad si degdeg ah uga sii daraysa.**

**Xaqiiji in adiga, qoyskaaga iyo saaxiibadaada aad is ilaalisaan iyo in uun qof kaa warhayo haddii aad xanuunsan tahay si ay isha kuugu hayaan. Tani waxay noqon kartaa nolol-badbaadin!**

### Wixii faahfaahin ah kala xiriir:

**Meningitis Research Foundation**
Khadka lacag la'aanta ah 0808 80 03 344
**www.meningitis.org**

**Meningitis Now**
Khad shaqeeya 24 saac
0808 80 10 388
**www.meningitisnow.org**

### Linkiyo waxtar leh:

- www.nhs.uk/conditions/meningitis
- www.nhs.uk/vaccinations
- www.nhs.uk/conditions/vaccinations/men-acwy-vaccine

UK Health Security Agency

NHS

© Crown copyright 2023
Product code IM23DISL1SO Somali. 1P 30k AUG 2023 (APS).
UK Health Security Agency gateway number: 2023-383


Buug-yarahaan waxa lagu heli karaa farta indhoolaha, Akhriska Fudud, qoraal fudud, maqal, muuqaal BSL ah waxaana lagu turjumay 28 luqadood. Fadlan booqo **www.healthpublications.gov.uk** si aad u dalbato koobiyadaada maanta ama wac 0300 123 1002

UK Health Security Agency

NHS

# Cudurka qoorgooyaha iyo sumowga dhiigga

## Ha iska indha tirin calaamadaha




immunisation
the safest way to protect your health

## La soco, diyaargarow

Meningococcal meningitis (oo ah caabuq/barar ku dhaca dahaarka maskaxda iyo tiirarka laf dhabarta) iyo septicaemia (sumowga dhiigga) waa cuduro dhif iyo naadir ah laakiin aad u daran oo dili kara ama naafayn kara dadka qaba dhibaatooyin caafimaad. Cudurada qoorgooyaha iyo sumowga dhiigga labaduba waxay keeni karaan 'sepsis'.

**Dhallinyarada, iyo ardayda jaamacaddaha dhigta gaar ahaan, ayaa ugu jira khatar dheeraad ah**. Laakin waxaad naftaada ka difaaci kartaa afar nooc oo cudurka qoorgooyaha adigoo qaadanaya tallaalka MenACWY ee lacag la'aanta ah.

## Naftaada ku difaac tallaalka MenACWY

Inta badan da'yarta UK iyo kuwa da'da yar ee dhashay Sebtembar 1996 waxa la siiyey tallaalka MenACWY inta ay ku jireen dugsiga laakiin way u qalmaan qaadashada tallaalka ilaa ay ka gaarayaan sanadka 25[aad]. Ardayda dibada ka timid ee galaya jaamacadaha UK markii ugu horeysay ee aan qaadan tallaalka MenACWY sidoo kale waxay xaq u leeyihiin qaadashada tallaalka ilaa ay ka gaarayaan sanadka 25[aad]. Haddii aad ka mid tahay mid ka mid ah kooxahan oo aanad weli qaadan tallaalka ballan ka qabso GP-gaaga hadda. Haddii aadan hubin arrintaan kala hadal rugta GP-gaaga.

Tallaalka MenACWY wuxuu aad waxtar ugu leeyahay ka hortagga 'meningococcal meningitis' iyo 'septicaemia' oo ay sababaan MenA, MenC, MenW iyo MenY.

Laakin xusuusnow in **tallaalkani aanu ka hortagi karin dhammaan noocyada cudurada qoorgooyaha iyo sumowga dhiigga**. Sidaas darteed aad bay muhiim u tahay inaad ka warqabto calaamadaha iyo astaamaha.



**Si joogto ah u hubi qof kasta oo aan caafimaad dareemayn, waxaa laga yaabaa inaad badbaadiso nolal**



**Ogow calaamadaha iyo astaamaha cudurada qoorgooyaha iyo sumowga dhiigga**





**Tijaabada/baaritaanka muraayadda/dhalada**

Dhinaca galaaska si adag ugu cadaadi finka si aad u aragto haddii finka uu baaba'ayo marka la saaro cadaadis. Haddii uusan baabi'in, raadso gargaar caafimaad isla markiiba. Haddii aad si aad ah u xanuunsan tahay, si kastaba raadso caawimaad, xataa haddii finanku baaba'aan ama aanuba soo muuqan.

## Waa maxay calaamadaha iyo astaamaha?

Qaar badan oo ka mid ah calaamadaha hore - matag, qandho, xanuun, daal guud iyo madax-xanuun - sidoo kale waxay calaamado u yihiin cudurro kale oo aan halis ahayn sida hargabka iyo ifilada. Laakin qofka qaba cudurada qoorgooyaha ama sumowga dhiigga wuxuu badanaa si daran u xanuunsadaa saacado gudahood.

Taasi waa sababta ay aad muhiim u tahay in la sii wado hubinta qof xanuunsan si aad u ogaato haddii ay si degdeg ah uga sii darayaan iyo si aad uga sii hubiso calaamadaha iyo astaamaha. Si degdeg ah u raadso gargaar caafimaad haddii aad ka welwelsan tahay iyaga ama caafimaadkaaga.

Aad bay muhiim u tahay in laga eego gacmaha iyo cagaha inay qabow yihiin, xanuun addimada ah oo daran iyo maqaar casaan ah ama guduudan, maadaama kuwani ay yihiin calaamadaha ka soo doona xilliyada hore ee xanuunka. Astaamaha sida finan aan baaba'ayn (sameey tijaabada muraayadda/galaaska), jahawareer ama caajisnimo, ama hurdo aad u weyn oo aan laga soo kacayn ayaa ah astaamo aad u daran.

## Sidee ayuu u faafaa cudurka qoorgooyaha?

Bakteeriyada keenta cudurradan waxay badanaa ku faaftaa u dhowaansho muddo dheer ah. Kiisaska badankood si gaar ah ayay u dhacaan laakiin dillaacyo ayaa mararka qaarkood ka dhaca dugsiyada ama meelaha ay dadku ku nool yihiin ee la wadaago, sida hoolalka jaamacadda.

**Tallaalka MenACWY ka qaado rugta GP-gaaga. Meelaha qaarkood waxaa laga yaabaa in laga heli karo farmasiga xaafada.**